**SOMALIA: Breda ayaa ka Caansan Amsterdam – Sabab?**
**Waxaa qoray: Hussein Abdilaahi**

**Safar la yaab leh oo iga dhigay yaabane…**
Markii aan booqday Soomaaliya, arrin aanan filayn ayaa i qabsatay. Qof kasta oo aan la kulmo haddii aan u sheego inaan ka imid Netherlands ama Holland, wuxuu si toos ah iigu weydiinayaa:
**"Ma Breda ayaad degan tahay?"**

Markaan u sheego inaan deganahay *Amsterdam* – caasimadda dhaqaalaha Netherlands – waxay u muuqataa mid aan xiiso lahayn. Intooda badan Somalida waxba kama yaqaaniin *Netherlands*, laakiin waxay si cad u yaqaanaan *Holland*, dal ay ugu yeeraan magac ahaan. Sidoo kale, magaalada *Breda* ayaa si lama filaan ah uga caansan *Amsterdam* marka laga hadlayo bulshada Soomaaliyeed. **Laakiin maxaa sababay?**

**Dahab iyo Dahir – Sababta Caanka!**
Magaalada *Breda* waxaa lagu yaqaanaa hal magac oo qura marka laga eego aragtida Soomaalida: **Dahir Alasow** – wariyaha ugu caansan ee Soomaaliyeed, hal-abuur leh, madax-bannaan, lana aaminsan yahay inuu asal ahaan ka soo jeedo qoyska boqortooyada Soomaaliyeed.

**Waa kuma Dahir Alasow?**
Waxaa loo yaqaanaa xog-badane daaha ka fayda xaqiiqooyinka la qariyo. Horey waxaa loogu jeclaa warbixinnadiisa kashifaadda ah, balse sannadihii dambe wuxuu ku leexday waddada **samafalka** iyo **caawinta bulshada dhibaateysan**.

Isaga ayaa aasaasay **Waagacusub Media** – warbaahin

madax-bannaan oo caan ku ah baahinta wahararka xogta iyo xasaasiyadda leh. Intaa kaliya ma aha, wuxuu curiyay maxkamad la yiraahdo **SOM CIVIL COURT** – taasoo noqotay **barnaamij maxkamadeed** oo dadweynuhu daawashadiisa ka dhaxlaan cadaalad, caawimaad iyo xukun bulsho.

**Tusaalooyin la yaab leh oo ka mid ah hawshiisa:**

- **Gabadh uur leh oo lagu xiray Guriceel** lacagna lagu lahaa $70,000 – waxaa lagu sii daayay lacag uu Dahir Alasow u aruuriyay hal saac gudaheed.
- **Dad la waayay muddo 30 sano ah** – kuwaas oo uu xogtooda helay kadibna la xariiray eheladooda, isagoo adeegsanaya baaris iyo xiriir caalami ah.
- **Tahriibayaal iyo muqalasiin** – wuxuu dabagal ku sameeyay dambiilayaashii tahriibka dhalinyarada Soomaaliyeed, wuxuuna soo bandhigay magacyadooda, akoonadooda iyo dadka ay dhaceen.
- **Kumanaan qof oo la dilay qurbaha** – wuxuu iftiimiyay xogtooda si eheladooda ay u helaan xaqiiqada dhimashadooda.
- **Barnaamijka "Biilka Dir ka hor 26-ka bisha"** – waxaa lagu furay rag Somali ah oo qurbaha jooga balse aan gudan mas'uuliyadda qoyskooda ee Africa ku sugan.
- **Samafalka gudaha Soomaaliya** – wuxuu qoday 37 ceel, dhisay 5 xarumood oo agoonta lagu xanaaneeyo, sameeyay dugsiyo Qur’aan, guryo barakacayaal ku nool yihiin iyo kaabayaal nololeed oo muhiim ah.

**Muxuu kaga duwan yahay dadka kale?**
Dahir Alasow ma aha kaliya wariye. Waa codka kuwa la aamusiiyay, waa gacanta kuwa baahan, waa indhaha kuwa arki waayay. Wuxuu noqday halyeey dadka Soomaaliyeed ay ku faanaan, kana dhigeen astaan qaran. Saraakiisha siyaasadeed, ganacsatada iyo qurba joogtaba – dhammaantood wuu ka yaabiyay, mararka qaarna wuxuu noqday qof ay ka cabsadaan.

**Breda oo ka caansan Amsterdam – Xaqiiqo Soomaali leedahay!**
Inkasta oo aanay dadka reer Netherlands badankoodu ogayn, haddana Dahir Alasow wuxuu sababay in *Breda* ay noqoto magaca koowaad ee lagu xasuusto marka la maqlo "Soomaali ku nool Netherlands." Breda waxay la macno tahay halganka, caawinta, cadaaladda, iyo geesinimada uu matalo **Dahir Alasow**.

**Gunaanad:**
Marka xigta aad safar ku tagto Soomaaliya, haddii lagaa weydiiyo "*Ma Breda ayaad degan tahay?*" ha yaabin. Jawaabtu waxay ku jirtaa magaca **Dahir Alasow** – ninka Breda ka dhigay **Astaanta Soomaalida ee Holland**.